

## Welwel Laga qabo Tayada Hawada Gudaha Goobaha Kirada ah ee Ku Dhow US Cleaners (Parkway Plaza)

Waaxda Caafimaadka Minnesota (Minnesota Department of Health, MDH) ayay ka codsatay Hay'adda Xakamaynta Wasakhogga Hawada Minnesota (Minnesota Pollution Control Agency, MPCA) inay wax ka qabato tayada hawada gudaha dukaammada tafaariqda ah ee Parkway Plaza kuna yaal waddada Hiawatha Avenue ee ku taal Minneapolis. Uumiga kiimikada (perchloroethylene, PCE) dhar dhaqa qalalan (dry cleaning ) ayaa laga helay hawada meheradaha ku dhex yaal Parkway Plaza. Xaashidan macluumaa ayaa loogu talagalay in lagu wargaliyo meheradlayaasha iyo dadka kale ee jooga wakhtiga badan gudaha Parkway Plaza heerarka PCE ee laga helay hawada.

### Arrimaha Ku Saabsan PCE iyo Caafimaadka

MDH ayaa ku talineysa in tallaabooyin loo qaado sidii loo yarayn lahaa ku bixitaanka PCE ee dadka marka la joogo Parkway Plaza. MDH ayaa aamminsan inayna dadku neefsan heerarka PCE ee ka jira Parkway Plaza.

Saamayn ku yeelasho caafimaad ayaa dhacda markay dadku neefsadaan hoorayaasha sare ee uumiga PCE ee ku jira hawada sannado badan. Shaqaalaha ay ku baxdo sannado badan PCE iyaga oo ka shaqaynaya dhar dhaqa qalalan ama meherado kaleba ee isticmaala PCE ayaa laga yaabaa waliba kordhiso qaaditaanka kansarrada. *Aad ayay u yartahay halista koradhka kansarka hoorayaasha PCE ee laga helay Parkway Plaza.*

Ku bixidda PCE ayaa ku damabyn karta saamayn ku yeelasho dareemayaal sida isbeddel arag, dareen-celin ka gaaban sidii hore, yaraan hawlo dhimireed. Sida caadiga ah calaamadahan inta badan ama dhammaantoodba ayaa laga yaabaa inay iska tagaan kaddib markay joogsato ku-bixitaanku. *Lagama yaabo inay heerarka PCE ee laga qiyaasay hawada gudaha meheradaha ku xiga US Cleaners ay leeyihiin sarrayn ahaan u horseedda noocacan saamaynta ku yeelanaya caafimaadka.*

### Hawl-gallada Goobta

Sida aad la socotaanba, hawlaha ka baaritaanka iyo ka yaraynta bey'adeed ayaa ka dhacay Parkway Plaza muddadii ahayd dhownkii bilood ee la soo dhaafay. PCE ayaa laga helay ciidda ka hooseysa US Cleaners mar lagu guda jiray qiimayn bey'adeed looga baahnaa dib-u-deynsad. Uumiga PCE ee ku jira gudaha dhismayaasha ayaa loo qaatay inay ka yimaaddeen dhismaha hoostiisa oo ahayd ciidda oo faddarowday. Nidaam yareeya uumiga ciidda ayaa lagu rakibay gudaha goobta US Cleaners markay ahayd Maarj 2014. Nidaamka ayaa loogu talagalay sidii u hoos ugu dhigi lahaa qadarka uumiga PCE ee ku jira hawada gudaha meheradha ku ag dhow. Intaa waxa u dheer, iyada oo lagu rakibay filtero hawo kaarbon gudaha soo-qaadayaasha hawo ee meheradaha ku xiga US Cleaners iyo xarunta xannaanada maalintii ee ku dhow. Hawada gudaha dhismayaasha iyo nagasta ciidaa ee ka hooseeya dhismaha ayaa waliba la tijaabiyaya markay ahayd Abril 28, 2014 kaddiib markii la rakibay nidaamka iyo filtarrada.

Tijaabintii hawada gudaha ayay natijadeedu muujinayaan sida socota:

- Hoorayaasha PCE ayaa ka badnaa heerka qiimaynta waskhda hawada (ISV) ee loogu talagalay goobaha shaqo ee ganacsiyada goobo kasta oo sambalka laga qaaday.
- Heerarka PCE ee gudaha Parkway Plaza ayaan ka sii fiicnaan kaddib markii hore ee lagu rakibay nidaamka yaraynta iyo filtarrada hawada kaarboonka.
- Iyada oo salka ku haysa natijooinkii tijaabinta, waxay u muuqataa inay isha ugu weyn PCE-da hawada gudaha dhismayaashu ay u badan tahay inay tahay ku isticmaalka kiimikada ee goobata shaqada US Cleaners. Qadar yar oo PCE ayaa laga yaabaa inuu ka yimaad hoosta dhismaha oo dhulka ah.

- Si aad u hesho natiijooyinka sambal garaynta oo dhammaystiran, fadlan nagala soo xiriir Waaxda Caafimaadka Minnesota. (<http://www.health.state.mn.us/divs/eh/hazardous/sites/hennepin/uscleanerspp.pdf>)

### Tallaabooyinka xiga

MPCA ayaa dhawaan beddeshay nidaamka yaraynta uumiga ciidda ee ka saarayay PCE-ga ku jiray ciidda Plaza-da hoosteeda si hoos loogu dhigo qadarka PCE ee ku dhix jira goobaha meheradeed. Sidoo kale, filterro kaarboon intii hore ka badan ayaa la rakibaya. Sambal ka qaad dheeraad ah, oo ka mid ah tijaabada hawada gudaha dhismaha, ayaa loo qorsheeyay mudadda dhowrka maalmood ee soo socda si loo garto inay isddelladani yareynayaan heerarka guud ee PCE iyo in kale hawada gudaha. Intaa waxa dheer, meheradlayasha MPCA, US Cleaners iyo Parkway Plaza ayaa ka wada hadlaya siyaabaha lagu yarayn lahaa PCE-ga iyo sidii loogu kordhin lahaa wareegga hawada nadiifta ah giddi meheradaha.

### La xiriirkha su'aalaha aad ka qabto arrimaha ku saabsan halista caafimaadka:

Fadlan igala soo xiriir 651-201-4906 ama [carl.herbrandson@state.mn.us](mailto:carl.herbrandson@state.mn.us)

Carl Herbrandson, PhD,

Minnesota Department of Health – Site Assessment and Consultation Unit

625 Robert Street N, P.O. Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975

### Eeg barta interneka Waaxda Caafimaadka Minnesota si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan PCE iyo Caafimaadka:

[www.health.state.mn.us/divs/eh/hazardous/topics/perc.pdf](http://www.health.state.mn.us/divs/eh/hazardous/topics/perc.pdf)

Xaashidan macluumaad waxa lagu diyaariyay qayb ahaan taageero laga Hay'adda Federaalka ee loogu talagalay Diiwaangalinta Walaxda Sunta ah iyo Cudurrada (Agency for Toxic Substances and Disease Registry, ATSDR). Weedhani micnaheedu ma aha ATSDR ayaa ayidday waraaqdan macluumaad.

June 2014